

Tababar ku saabsan siddii dumarka wadanka u soo haajirey u samysan lahaayeen shirkaddo ay iska leeyihiin



CIDDA LOOGU TALAGALAY TABABARKAN

Tababarkan waxaa marka hore loogu talagalay waaxda arrimaha bulsahada iyo caafimaadka iyo weliba waaxda addeega waxaa sidoo kale iyana loogu talagalay cid alaale iyo ciddii xiiseynaysaa inay wax ka ogaadaan sida shirkadduhu u shaqeeyaan iyo sidoo kale dumarka wadanka u soo haajirey ee qorsheynaya inay samaysataan shirkado.

Ka qayb-galka tababarkani uma baahna in aqoon loo leeyahay shirkaddaha iyo siday u shaqeeyaan. Ka qayb-qaadashada tababarkan waxaa laysaga baahan-yahay waxoogaa luqadda finnishka ah. Tababarkan waxaa loo qaadanayaa ilaa 20 qof.

AHMIYADDA TABABARKAN

Ahmiyadda laga leeyahay tababarkani waa in xog iyo aqoon xirfaddeed oo ku filan lagu siiyo dumarka wadanka u soo haajirey ee danaynaya inay waxka oggaadaan siday shirkaddahu u shaqeeyaan iyo weliba sidoo kale kuwa damacsan inay samaystaan shirkaddo ay leeyihiin ugu dhiiran lahaayeen samasashada shirkaddo ganacsi oo ka hawlgala wadanka Finland.

TABABARKAN WAXAA LAGU BARANAYAA

- Samaysashada shirkadaha iyo siday u shaqeeyaan iyo weliba shirkadaha ganacsiga Finland.
- waaxda caafimaadka iyo bulshada iyo weliba shirkadaha addeega Finland su'aalo la xidhiidha iyo weliba
- aqoonta shirkadlaha u lahaan-karo dhaqamo kala duwan iyo sidoo kale lahaanshaha xirfad uu ku horumarinkaro shirkadda iyo weliba awoodii uu ku hanan lahaa shirkadda

HIRGELINTA

Ka qaybgalayaasha tababarkan waxaa la siinayaa tababar u gaara oo ku saabsan shirkaddaha, taasoo looga goleeyahay inay suurto gal ka dhigto samaysashada shirkaddo gaar loo leeyahay. Tababarka waxaa ka mid ah shaqooyin qofku si madax bannaan u qabanayo si uu u dhiso ama u helo fikrado iyo qorshe la xidhiidha samaysashada shirkad uu leeyahay iyo weliba kuwo lagu hagayo oo wadajir ahaan loo qabanayo.

Ka qayb galayaasha tababarkan waxaa lagu siinayaa qorshe u gaara oo ah in uu helo fikrad iyo qorshe la xidhiidha samaysashada shirkadda. Sidoo kale waxay ka qayb gelayaan shaqooyin wada-jir loo qabanayo. Waxaa kaloo ka qayb-gelaya dumar tababarayaal ka ah sida shirkaddu u shaqeeyaan.

Ka qayb galayaasha tababarkan ku saabsan shirkaddaha waxaa la siinayaa shahoodo ay bixiso iskuulka waxbarashada sare ee Diakonia (Diakonia-ammattikorkeakoulun)



BOOSKAAGA CODSO HADDEER

Foomka codsashada ka dalbo emailka ciwaankiisu yahay palvelu.helsinki@diak.fi ama telefoonka 040 509 0283

WAXA TABABARKA KU HOOS JIRA (SISÄLLÖT)

Bulshada finnishka iyo lahaanshaha shirkadda

Siddii adigoo shirkad leh uga dhex shaqayn lahayd wadanka Finland iyo weliba dhaqanka finnishka, Shirkaddaha finnishka iyo qaabkay u shaqeyso iyo weliba wixii gaarka u ah.

Shirkadley ahaansho

Eray bixin ku saabsan shirkadda

Shirkadda ka shaqaysa Finland iyo waxa looga baahan yahay:

Nooca shirkadda, abuurista shirkadda, dhaqaalaha shirkadda iyo wixii kale ee shirkaddu leedahay ama rabto inay qabato sida waxay rabto inay soo saarto, waxa soo gala, lacagta maalgashiga ,sida shirkaddu u shaqaynayso, suuq-geynta shirkada, sharciyada shirkadda sida canshuurta (vero) iyo weliba helista meel ku habboon shirkadda oo ay ka shaqan karto, su'aalo gaara oo la xidhiidha siday u shaqeeyaan shirkaddaha waaxda caafimaadka iyo bulshadu.

Fikirka shirkadda, wax soo saarka iyo qorsheynta xarrumaha ganacsiga iyo weliba siddii loo dhisi-lahaa ama horumarin-lahaa.

Isku xidhka wada shaqayneed ee shirkadda iyo abuurista shabakaddo wada shaqeeya iyo macnaha ay leeyihiin.

Daryeelka dhaqaale ee Shirkadlaha iyo shaqaalaha shirkadda.

Kobcinta xirfadda loo leeyahay shirkadda iyo horumarinteeda

Sida shirkadluhu u yaqaano dhaqamo kala duwan iyo awoodda shirkadda

INTA TABABARKU QAADANAYO

Tababarku wuxuu ka kooban yahay 8 dhibcood (opintopistettä) oo dhan (135 saacaddood), iyadoo shaqadu ay dhan tahay 55 saacaddood.

Codsigu wuxuu dhacayaa 20.8.2010

Warbixin dheeraad ah ee ku saabsan iskuulka waxaad ka helaysaa:

Helena Pesonen, isuduwaha mashruuca

Tel. 040-7501132,

helena.pesonen@diak.fi

GOORTA WAXBARSHADU BILLAAMAYSO

Tababarka koowaad wuxuu billaamayaa isniinta
8.9.2008 klo 16.30-20.30

QIIMAHA 100 euroa

CODSASHADA

Codsiigu waxbarashadu wuxuu dhammaanayaa 20.8.2010

Waraqaha wax lagu codsanayo waxaa laga dalban-karaa emailkan ciwaankiisu yahay
palvelu.helsinki@diak.fi ama telefoonka 040 509 0283.

Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heli-kartaa isuduwaha mashruuca Helena Pesonen, puh. 040 –
7501132

Emailka helena.pesonen@diak.fi



Naisyrittäjyys
keskus



Diakonia-ammattikorkeakoulu
Helsingin toimipaikka
Puhelin. 0405090283
palvelu.helsinki@diak.fi
www.helsinki.diak.fi